Horn Institute for Peace and Development

Xakamaynta Safmarka COVID-19: Kaalinta Dowlad Goboleedyada

Qormo Kooban

Juunyo 2020

Hordhac

Safmarka COVID-19 waxa uu ku soo aaday xilli ay Soomaaliya wajahayso xaalado adag, kuwaas oo ay ugu horreeyaan fatahaadda webiga shabeelle, aafada ayaxa, ammaan la'aan iyo dhaqaale xumo. Sidoo kale, wuxuu ku soo aaday xilli ay Soomaaliya isu diyaarinayso doorashooyin qaran oo la filayo in ay dhacaan dabayaaqada sanadkan 2020 iyo horraanta sanadka 2021. Marka laga soo tago duruufahaas jira, waxaa weli taagan caqabado kale oo ay Soomaaliya wajahayso xilligan. Waxaa ka mid ah in aysan lahayn nidaam caafimaad oo awood u leh in uu bixiyo adeegga caafimaadka guud iyo fayodhowrka bulshada. Intaas waxaa sii dheer, in Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada aysan lahayn awood dhaqaale, farsamo iyo agab caafimaad oo ay kula tacaalaan xakamaynta cudurka COVID- 19.

Tan iyo markii cudurku uu soo shaac baxay dhammaadka sanadkii 2019, loona aqoonsaday in uu yahay cudur safmar ah bilowga sanadkan 2020, waxa uu si baahsan ugu faafay dalal badan oo adduunka ah. Soomaaliya waxa ay ka mid noqotay dalalka la tacaalaya xakamaynta faafitaanka cudurkaas iyo khasaarahiisa. Waxaa la qaaday tallaabooyin ka hortag ah oo ay ugu horreeyaan in la joojiyey isku socodka diyaaradaha gudaha iyo dibadda, in la xiray goobihii waxbarashada sida iskuulada iyo jaamcadaha.

Qormadan kooban waxa ay diiradda saaraysaa kaalinta Dowlad Goboleedyada ee ku aaddan xakamaynta faafitaanka cudurka COVID-19. Waxay qiimeyn ku sameynaysaa saameynta caafimaad, dhaqaale iyo amni ee xanuunku ku yeeshay Dowlad Goboleedyada. Ugu dambeyn, qormadu waxay soo gudbinaysaa talooyin wax ku ool ah, oo ku socda Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada.

Kaalinta Dowlad Goboleedyada Ee Ku Aaddan Xakamaynta COVID-19

Intii u dhexeysay Bishii Abriil ilaa Maajo 2020, Safmarka COVID-19 waxa uu aad ugu fiday Dowlad Goboleedyada dalka. Marka la eego macluumaadkii ugu dambeeyey ee Wasaaradda Caafimaadka soo gudbisay 15 kii bishan Juunyo 2020, tirada guud dadka la xaqiijiyey in uu ku dhacay COVID-19 waxa uu maraayey in ka badan laba kun iyo shan boqol (2,500) oo qof. Sidoo kale, wadarta guud dadka laga helay COVID-19 ee ku nool Dowlad Goboleedyada sida Puntland, Galmudug, Jubbaland, Hirshabeelle iyo Koonfur Galbeed waxa ay gaareen in ka badan lix boqol (Fiiri shaxda hoose). Sida ka muuqato shaxda, cudurku waxa uu ku sii yaraanayaa Gobolka Banaadir halka uu ku badanayo Dowlad Goboleedyada.

Magaca Dowlad Goboleedka	**Tirada la xaqiijiyey**
Puntland	235
Galmudug	112
Hirshabelle	23
Koofur Galbeed	137
Jubbaland	168

Wadarta Guud	**675**

Tixraac: Wasaaradda Caafimaadka Dowlada Fadaraalka Soomaaliya.

Safmarka COVID-19 waxa uu khatar caafimaad ku yahay guud ahaan bulshada Soomaaliyeed, isaga oo bilooyinkii u dambeeyey si weyn ugu dhex faafay magaallooyinka waaweyn ee Dowlad Goboleedyada iyo Gobolka Banaadir. Si kastaba ha ahaatee, Dowlad Goboleedyadu waxa ay qaadeen tallaabooyin looga hortagayo baahidda cudurkaas, laguna xaddidayo khasaarahiisa caafimaad, dhaqaale, bulsho iwm... Tallaabooyinkaas waa kuwa intooda badan iskummid ah, oo waafaqsan yihiin tilmaamaha iyo talooyinka ay soo saarto Wasaaradda Caafimaadka Soomaaliya iyo Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO), kuwaas oo loogu talaggalay in looga hortago faafitaanka cudurka COVID19. Dowlad Goboleedyada iyo Dowlad Federaalka mid kasta waxa uu goonidiisa u qaaday tallaab wax ku ool ah, taas oo la xiriirta dhisidda xarumo karantiil, kuwaas oo loogu talaggalay in lagu baxnaaniyo dadka laga helo cudurka COVID-19 (Fiiri shaxda hoose).

Magaca Dowlada Goboleedka	**Magaca Xarunta**	**Magaalada**	**Tirada Sariiraha**
Puntland	Xarunta Karantiilka Garowe	Garowe	18
	Xarunta Karantiilka Waqooyiga Gaalkacyo	Gaalkacyo	20
Galmudug	Xarunta Karantiilka Dhuusamareeb	Dhuusamareeb	28
	Xarunta Karantiilka Cadaado	Cadaado	17
Jubbaland	Xarunta Karantiilka Maxfalka	Kismaayo	30
	Xarunta Isbitaalka Dhoobleey	Dhoobleey	15
	Xarunta Isbitaalka Dooloow	Dooloow	12
Hirshabeelle	Xarunta Karantiilka Jowhar	Jowhar	16
Koofur Galbeed	Xarunta Isbitaalka Baydhabo	Baydhabo	30

Tixraac: Wasaaradda Caafimaadka Soomaaliya

Marka laga soo tago tallaabooyinkaas wax ku oolka ah ee la qaaday, waxaa jira laba caqabadood oo ay wajahayaan Dowlad Goboleedyadu. Midda koowaad, Dowlad Goboleedyada qaar sida Galmudug, Jubbaland, Hirshabeelle iyo Koonfur Galbeed ma haystaan sheybaarka lagu baaro cudurka COVID-19.

Dalka oo dhan waxaa yaala saddex sheybaar. Mid wuxuu yaala Muqdisho, labada kalana waxa ay kala yaalaan Garowe iyo Hargeysa.[1] Caqabadda labaad, dhammaan Dowlad Goboleedyada aan kor ku soo xusnay waxa ay wajahayaan culeys dhanka isku socodka ah maadaama ay xiran yihiin duullimaadka diyaaradaha ee gudaha. Sidaas darteed, waxaa ku adkaatay in dheecanada dadka baaritaanka lagu sameynayo ay u soo qaadaan Muqdisho.

[1]Fiiri qormadan kooban: https://hipad.net/xakamaynta-safmarka-covid-19-kaalinta-dowladda-iyo-bulshada/

Dowlad Goboleedka Jubbaland

Dowlad Goboleedka Jubbaland oo iskaashi iyo taageero maaliyadeed ka helaysa Xukuumadda Federaalka, waxa ay qaadday tallaabooyin ka hortag ah tan iyo markii safmarka COVID-19 uu soo gaaray deegaannadeeda. Tallaabooyinkaas waxaa ka mid ah:

1. In la dhisay guddi heer wasiir ah oo ka hortaga cudurka COVID-19, oo uu guddoomiye u yahay Wasiirka Caafimaadka Jubbaland.
2. Dadka oo lagu wacyigeliyay in ay sameeyaan waxyaabaha aasaasiga ah ee looga hortagi karo faafitaanka cudurka sida isticmaalka marada afka lagu xirto, gacmo dhaqashada iyo kala fogaanshaha. Sidoo kale, goobaha bulshadu isugu timaaddo sida hoteelada, maqaayadaha, xarumaha maamulka ayaa la dhigay agabka nadaafadda sida saabbuunta, biyo nadiif ah iyo daawada gacmaha lagu dhaqdo.
3. Xuddaadaha laga soo galo deegaannada Jubbaland oo la geeyey shaqaale caafimaad, kuwaas oo baaritaan hordhac ah ku sameeya dadka ka soo gudbaya.
4. Diyaarinta xarumo karantiil oo gaar ah, kana fog xarumaha kale ee caafimaad, ee ka jira magaalada.
5. Waxaa la sameeyey nambarka gaaban oo ay soo wici karaan dadweynuhu, goorta ay u baahdaan gargaar caafimaad.

Ugu dambeyn, iskaashigaas iyo wadashaqeyntaas u dhexeysa Jubbaland iyo Xukuumadda Federaalka waxa ay dowr weyn ka qaadataa in si wadajir ah loo xakameeyo khasaaraha nafeed, caafimaad, dhaqaale iyo bulsho oo uu cudurku sababi karo.

Dowlad Goboleedka Puntland

Safmarka COVID-19 waxaa laga dareemay deegaannada Puntland bilowgii bisha Febraayo 2020. Intaas wixii ka dambeeyey, maamulka Puntland waxa uu qaaday tallaabooyinkan hoos ku xusan, kuwaas oo loogu talaggalay in lagaga hortago faafitaanka cudurka, laguna xakameeyo saameyntiisa taban ee ka dhalan karta. Tallaabooyinkaas waxaa ka mid ah:

1. Waxaa la dhisay guddi sare oo qaabilsan ka hortaga iyo xakamaynta cudurka COVID-19, kaas oo uu guddoomiye u yahay Madaxweyne Saciid Abdullahi Deni.
2. Waxaa la joojiyey salaadaha iyo hawlahii waxbarashada ee ka socday masaajidda, waxaana la xiray goobihii waxbarashada iyo meelaha ay isugu timaaddo bulshada sida hoteelada, maqaayadaha iwm... Sidoo kale, waxaa la soo rogay bandow ka billaabanaya salaadda maqrib ka dib ilaa shanta subaxnimo ee arrootii.
3. Bishii Maarso, 2020 maamulku wuxuu soo saaray go’aan uu ku mamnuucay dhammaan doomaha ka kalluumeysta xeebaha deegaanadiisa.
4. Waxaa la howlgeliyay nambar guud oo ay soo wici karaan dadweynaha goorta ay u baahdaan gargaar caafimaad.

5. Waxaa la dhisay xarumo lagu baxnaaniyo dadka qaba cudurka COVID-19 oo ku yaala Garowe, Bossaso iyo Galkacyo.

Marka laga soo tago dadaaladaas wax ku oolka ah ee Puntland ugu jirto sidii ay u xakamayn laheyd faafitaanka cudurka COVID-19, waxaa iyana jira caqabado ay ka mid yihiin in agabka caafimaad iyo haamaha oksijiinta lagu keediyo ay ku yar yihiin deegannada Puntland. Waxaa xusid mudan in Puntland iyo Xukuumadda Federaalka ay iska kaashadaan dadaalada lagaga hortagayo faafitaanka COVID-19, laguna xakameynayo khasaarahiisa.

Dowlad Goboleedka Galmudug

Dowlad Goboleedka Galmudug waxa uu xilligan wajahayaa laba caqabadood oo waaweyn marka ay timaaddo xakameynta cudurka COVID-19. Midda koowaad, hay'adahii qaabilsanaa bixinta adeegga caafimaadka guud iyo fayodhowrka bulshada oo aan weli sidii la rabay u hanaqaadin, taas oo ay la wadaagaan inta badan Dowlad Goboleedyada kale iyo Gobolka Banadir. Midda labaad, waa Galmudug oo la taacaalaysa caqabado dhaqaale, siyaasad iyo mid amnidarro. Iyada oo ay jiraan dhammaan duruufahaas, haddana Galmudug waxa ay qaadday tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu xakameynayo saameynta taban ee ka imaanaysa cudurka COVID-19, iyada oo iskaashi iyo taageero maaliyadeed ka helaya Xukuumadda Federaalka. Tallaabooyinkaas waxaa ka mid ah:

1. In la dhisay guddi heer wasiiro ah, oo ay hormuud u tahay Wasaaradda Caafimaadka Galmudug.
2. Xudduudaha laga soo galo deegaanada maamulka waxaa la geeyey xirfadlayaal caafimaad si wacyigelin iyo baaris ugu sameeyaan dadka ka soo gudbaya.
3. Waxaa la sameeyey wacyigelin ku aaddan halista iyo sida lagaga hortagi karo cudurka COVID-19. Waxaana la sameeyey nambarka gaaban oo dadweynuhu ay soo wici karaan goorta ay u baahdaan gargaar caafimaad.
4. Waxaa dib loo hawlgaliyey Isbitaalkii dhuusamareeb, waxaa la dhisay xarumo karantiil oo lagu baxnaaniyo bukaanada qaba cudurka COVID-19, sidoo kale waxaa tababar loo sameeyey xirfadlayaasha caafimaad ee ku hawlan ka hortaga cudurka.
5. Waxaa la xiray goobihii waxbarashada sida iskuulada iyo jaamacadaha. Sidoo kale, waxaa la xiray goobaha bulshadu isugu timaaddo.

Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed

Iyada oo Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed la tacaalayso mushkilado kala duwan, haba ugu horreyso dhaqaale xumo iyo agab yari caafimaad ayuu safmarka COVID-19 soo gaaray deegaanadeeda. Tan iyo markaas wixii ka dambeeyey, Maamulku waxa uu qaaday tallaabooyin ka hortag iyo xakamayn isugu jira, kuwaas oo ku aaddan sidii loo yareen lahaa khasaaraha ka

dhalanaya baahidda cudurka. Waxaana tallaabooyinkaas ka mid ah:

1. In la dhisay guddi sare oo uu guddoomiye u yahay Madaxweyne Abdiaziiz Laftagareen.
2. Waxaa la sameeyey wacyigelin ku aaddan halista iyo sida lagaga hortagi karo cudurka COVID-19.
3. Waxaa la hawlgeliyey nambarka gaaban oo dadweynuhu ay soo wici karaan goorta ay u baahdaan gargaar caafimaad.
4. Waxaa la dhisay xarumo lagu baxnaaniyo dadka laga helo cudurka.
5. Waxaa la xiray goobihii waxbarasho sida iskuulada iyo jaamacadaha. Sidoo kale, waxaa la xiray goobaha bulshadu isugu timaaddo.

Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed waxa uu kaalmo isugu jirta agab caafimaad iyo dhaqaale ka helay Xukuumadda Federaalka iyo Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO). Taas oo ka caawisay dadaalada ay Koonfur Galbeed ugu jirto ka hortaga iyo xakamaynta cudurka.

Dowlad Goboleedka Hirshabeelle

Dowlad Goboleedka Hirshabeelle oo ka mid ah meelihii ugu horreeyey oo ka baxsan caasimadda oo uu cudurkan COVID-19 saameyn ku yeeshay, taas oo keentay in ay qaadaan tallaabooyin lagaga hortago faafitaanka iyo xakamaynta cudurka. Tallaabooyinkaas waxaa ka mid ah:

1. In la dhisay guddi sare oo uu guddoomiye u yahay Wasiirka Caafimaadka Hirshabeelle.
2. Waxaa la dhisay xarumo loogu talaggalay in lagu baxnaaniyo dadka looga shakiyo in ay qabaan COVID-19
3. Maamulku wuxuu sameeyey wacyigelin, wuxuuna doodo ku saabsan halista COVID-19 u qabtay dhaqaatiirta ka hawlgasha xarumaha caafimaad si dadka ay u wacyigeliyaan. Sidoo kale, waxaa la yagleelay xarunta xiriirka dadweynaha iyada oo la furay numbarka gaaban oo ay soo wici karaan dadweynuhu goorta ay u baahdaan gargaar caafimaad.
4. Waxaa tababar caafimaad loo sameeyey xirfadlayaasha caafimaad ee ka hawlgala deegaanada hoos imaada maamulka.
5. Xudduudaha laga soo galo deegaanada maamulka waxaa la geeyey xirfadlayaal caafimaad si wacyigelin iyo baaris ugu sameeyaan dadka ka soo gudbaya.

Marka laga soo tago tallaabooyinkaas uu maamulku qaaday si loo xakameeyo cudurka COVID-19, Hirshabeelle wuxuu kaalmo isugu jira dhaqaale, agab iyo farsamo ka helay Xukuumadda Federaalka, taas oo qayb ahaan sare u qaadday diyaargarowgooda ku aaddan xakamaynta khasaaraha.

Guntii iyo gabagabadii, cudurka COVID-19 waxa uu saameeyey dunida oo dhan, iyada oo weli baadigoob loogu jiro sida ugu fudud ee lagu soo afjari karo ama loogu heli karo daawooyin iyo tallaal lagula tacaalo. Marka laga soo tago dadaalkaas caalamiga ah, cudurkan COVID-19 waxa uu saameyn taban ku yeeshay Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah. Saameyntu waxa ay ka muuqataa hoos u dhaca ku yimid dakhligii ka soo gali jiray ilahooda dhaqaale sida garoomada diyaaradaha, dekedaha, dalagga beeraha iyo dhoofinta xoolaha. Sidoo kale, waxa uu karantiil galiyey qaar ka tirsan mas'uuliyiinta Hirshabeelle oo uu ka mid yahay Madaxweyne Maxamed Cabdi Waare, waxaana u geeriyooday xubin ka tirsanaa golihiisa wasiirada.[2]

[2] Fiiri maqaalkan: https://www.aljazeera.com/news/2020/04/somali-state-minister-dies-coronavirus-200412144610362.html

Talooyin

Machadka HIPAD oo ka duulaya xogta sare ku xusan waxa uu soo jeedinayaa talooyinkan soo socda:

1. In Dowlad Goboleedyada dalka ay xoogga saaraan sidii ay u dhisan lahaayeen hay'ado iyo nidaam caafimaad oo awood u leh bixinta adeegyada caafimaadka guud iyo fayodhowrka ay bulshadu u baahan tahay.
2. In wacyigelinta COVID-19 si gaar ah loo gaarsiiyo dadka waayeelka ah iyo dadka la nool.
3. Dadaalada lagu xakameynayo cudurka COVID-19 waa in aysan caqabad ku noqon adeegyadii caafimaad oo ay bixin jireen isbitaalada gaarka loo leeyahay.
4. In Jubbaland, Koonfur Galbeed, Hirshabeelle iyo Galmudug ay helaan sheybaarka lagu baaro dadka qaba cudurka COVID-19.
5. In Xukuumadda Federaalka ay kordhiso kaalmada maaliyadeed, midda farsamo iyo tan agabka caafimaadka oo ay u fidinayso dhammaan Dowlad Goboleedyada dalka.
6. In Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyadu ay sii laba jibaaraan wadashaqeyntooda iyo iskaashigooda ku aaddan xakamaynta safmarka COVID-19.
7. In gargaarka caafimaad laga ilaaliyo musuqmaasuqa iyo in la siyaasadeeyo.
8. In Dowlad Goboleedyadu ay canshuur dhimis u sameeyaan ganacsatada ka hawlgasha deegannadooda.